IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 30ka Maarso 1989 L. 1 R 3

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 13 ee 4 Maarso 1989, Wax ka beddelka Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.- Bog; 147

### QTYBTA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 17 ee 28 Maarso 1989, Dib u habaynta Qaab Dhismeedka Wasaaradda Gaadhaandhigga.- » 152

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 18 ee 28 Maars o1989, Magacaabidda Taliyaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.- » 154

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 19 ee 5 Maarso 1989, Magacaabidda Guddiga Heer ka Qaran ee Gobollada W/Galbeed iyo Tog dheer. » 155

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 20 ee 4 Maarso 1989, Magacaabid Nootaayo. » 158

QAYBTA SAD/XADD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28.2.89, Lumid Buug Kayd L. 13513 ku qoran Marqaani Dayin Maxamed L. 63 » 159

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.3.89, Lumid J.W. L. 0744591 ku qoran Maxamuud Cabdalle Warsame L. 64 » 160

MAXKAMADDA G. BANAADIR 12.3.89, Lumid J.W.L. 1419561 ku qoran Maxamed Saciid Maxamed L. 65 » 161

MAXKAMADDA G. SH/HOOSE, 8.3.89 Lumid Buug Kayd L. 5919 ku qoran Xasan Cali Maxamuud L. 66 » 162

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.3.89, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Xasan Daahir Dhimbil L. 67 » 163

MAXKAMADDA G. BANAADIR 17.8.88 Lumid J/War. L. 1084752 ku qoran Shariif Cabdalla Cali Maxamed L. 68 » 164

MAXKAMADDA G. MUDUG, 18.3.89, Lumid Jeeg War. L. 1432606 ku qoran Cali Jaamac Biixi L. 69
qornayd Lacag dhan Sh.So. 100.000. » 165

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.3.89 Lumid Buug Kayd L. 18425 ku qoran Khadra Maxamuud Maxamed L. 70 » 166

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.3.89 Lumid Buug Kayd L. 18618 ku qoran Cabdulqaadir Khaliif Cabdulle L. 71 » 167

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.3.89 Lumid Buug Kayd L. 18348 ku qoran Maka Maxamed Yuusuf L. 72 » 168

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.3.89 Lumid Buug Kayd L. 4230 ku qoran Abshir Khaliif Cabdulle L. 73 » 169

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25.3.89, Lumid Jeeg War. L. 0039023 ku qoran Cabdulqaadir Cabdulle Axmed L. 74 » 170

## QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 13 ee 4 Maarso 1989, Wax ka beddelka Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Ereyga «QARAN» ee Dastuurku u isticmaalay macnaha «State», waxaa lagu beddelay ereyga «DAWLAD». Sidoo kale ereyga «Dawlad» waxaa lagu beddelay ereyga «XUKUUMAD».

Qod. 2aad

Qodobka 93aad ee Dastuurku wuxuu noqonayaa Qodobka 94aad, Qodobka 94aad wuxuu noqonayaa Qodobka 95aad, Qodobka 95aad wuxuu noqonayaa Qodobka 96aad, Qodobka 96aad wuxuu noqonayaa Qodobka 97aad ee isla Dastuuka.

Qod. 3aad

Qodobka 97aad iyo Qodobka 98aad ee Dastuurka waa lays raaciyey, waxayna noqonayaan hal qodob keliya, waxaana loo akhrin doonaa sidatan:

Qodobka 98aad (Midnimada iyo madaxbannaanida Garsoorka).

1. Garsoorka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waa mid mideysan.

2. Garsoorayaasha Maxkaamadaha iyo Xeer Ilaaliyeyaayaashu waa u madax bannaan yihiin hawshooda, lagamana qaadi karo xil, xaaladaha Sharcigu tilmaamay mooyaane, waxayna u hoggaansamayaan Sharciga oo keliya.

Qod. 4aad

Qodobbada iyo faqradaha soo socda ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaa loo beddelay sidan soo socota:

u leh dembiga loo haysto, muddada Sharcigu faraayo dhex-deeda.

2. Qodobka 41aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

Qodobka 41aad (Qaybaha dhaqaalaha)

Dhaqaalaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya wuxuu ka koobmaa qaybaha soo socda:

— Qaybta Hantida guud;
— Qaybta Hantida Iskaashatooyinka;
— Qaybta Hantida gaar ahaaneed;
— Qaybta Hantida isku dhafka ah.

3. Qodobka 43aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

Qodobka 43aad (Hal abuurka dhaqaalaha Dalka)

1. Dawladdu waxay qorsheyneysaa horumarinta dhaqaalaha Dalka, waxayna dhiirrigelineysaa hal abuurka dhaqaalaha ee Muwaadiniinta, si Sharciga waafaqsan.

2. Dawladdu waxay soo dhaweyneysaa, dammaanad qaa deysaana maalgelinta shisheeye ee Dalka gudihiisa, iyadoo lagu nidaaminayo Sharciyada u gaarka ah.

4. Qodobka 44aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

Qodobka 44aad (Ganacsiga dibedda iyo gudaha)

Dawladdu waxay nidaamineysaa ganacsiga dibedda iyo gudaha iyadoo ku hirgelineysa horumarinta dhaqaalaha Dalka.

5. Faqradda 2aad ee Qodobka 46aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

2. Tacliinta Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waa mid u daneyneysa waayaha iyo degaanka gaar ahaaneed ee Bulshada Soomaaliyeed.

6. Faqradda 2aad ee Qodobka 56aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

2. Dawladdu waxay xil iska saareysaa xannaanada naafada, carruurta aan waalidka lahayn iyo dadka duqooba hadday lahayn cid kale oo xannaaneysa.

7. Xarafka (c) ee Qodobka 82aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

c) Inuu bixiyo masaamax, cafis guud iyo mid gaar ahaaneed, ciqaabtana dhimo.

8. Faqradda 2aad ee Qodobka 95aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

2. Sharciga ayaa nidaaminaya awoodda Maamulka Hoose.

9. Faqradda 2aad ee Qodobka 96aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

2. Sharigu wuxuu tilmaamayaa dhismaha, awoodda, ilaha dhaqaalaha iyo xiriirka Golayaasha Shacbiga Degaanku la leeyihiin Xisbiga iyo Xukuumadda.

10. Faqradda 1aad ee Qodobka 97aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

1. Maxkamadaha iyo Xeer Ilaalintu waxay ilaalinayaan nidaamka Dawladda, Dastuurka iyo Shuruucda Dalka.

11. Faqradda 1aad ee Qodobka 100aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

1. Maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimoqaariga Soomaaliya waa kuwa soo socda:

Maxkamadda Sare, Maxkamadaha Racfaanka, Maxkamadaha darajada Koowaad iyo Maxkamadaha Ciidammada Qalabka Sida.

Qod. 5aad

Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaa lagu kordhiyey Qodob cusub oo loo akhrin doono sidatan:

Qodobka 93aad (Hantidhowrka Guud)

1. Hantidhowrka Guud waa hay'ad madax bannaan, qaabkeeda dhismo iyo shaqana Sharci gaar ah ayaa habeynaya.

2. Wuxuu u xilsaaran yahay hubinta hore ee waafaqsanaanta Sharciga ee hawlaha xukuumadda ee keenaya culeys maaliyadeed iyo kontoroolka dambe ee kharajka miisaaniyadda Xukuumadda.

3. Wuxuu baaraa, siyaabaha Sharcigu tilmaamayo, Maamulka Maaliyadeed ee Hay'adaha Dawladda iyo kuwa ay Xukuumaddu kharajkooda ka qayb gasho.

4. Wuxuu natiijada baaritaankiisa u soo gudbiyaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Golaha Shacbiga.

Qod. 6aad

— Faqradda 2aad ee Qodobka 96aad ee Dastuurka waa la

1. Faqradda 3aad ee Qodobka 26aad waxaa loo akhrin doonaa sidatan:

3. Qofkii tuhun dembi awgiis loo xiro, waa in si degdeg ah loo horgeeyaa Hay'adda Garsoorka ee awoodda sharciyeed baabi'iyey.

— Faqradda 3aad waxay noqoneysaa faqradda 2aad ee Qodobka 96aad ee Dastuurka.

Qod. 7aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa lixdan (60) maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4 Maarso 1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

XEER

Xeer Madaxweynaha JDS, Lambar 17 ee 28ka Maarso 1989: Dib u habaynta Qaab Dhismeedka Wasaaradda Gaashaandhigga.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S. iyo beddelaadii ka dambeeyay;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 15 ee 6dii Abriil 1960 kuna saabsan «Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed»;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 28 ee 17 Febrayo 1977 «Dib u habaynta Dhismaha W/Gaashaandhigga laguna mideeyey jagooyinka Wasiirka Gaashaandhigga iyo Taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed;

ISAGOO AQOONSADAY: Baahida loo qabo in qaab-dhismeedka W/Gaashaandhigga dib loo habeeyo isla markaasna la kala saaro xilka, waajibaadka iyo awoodda jagooyinka Wasiirka Gaashaandhigga iyo Taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELIYEY: Ra'yiga Wasiirka Gaashaandhigga.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad
(Dib u habaynta W/Gaashaandhigga)

Si Wasaaradda Gaashaandhigga ay u fuliso waajibaadka ka saaran difaaca Qaranka loona xoojiyo xilkeeda, maamulka sare waxaa loo beddelay loona habeeyey sida soo socota:

1. Marka laga bilaabo 1da Feberaayo 1989 waxaa la kala saaray jagooyinka: Wasiirka Gaashaandhigga iyo Taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

2. Waxaa dib loo dhisay jagada iyo magaca ah Taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Qod. 2aad
(Qeexid xilalka, waajibaadka iyo awoodaha)

Xilka, waajibaadka iyo awoodaha jagooyinka Wasiirka Gaanshaandhigga iyo Taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed waxay ku salaysan yihiin gundhigna u ah Xeer lamb. 16 ee 20 Maarso 1965 oo qeexaaya mas'uuliyadda jagooyinkaasi.

Qod. 3aad

(Dhismaha Taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed)

a) Taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed wuxuu ka koob- maa:

1. Taliska Ciidanka Dhulka X.D.S. ee

2. Taliska Ciidanka Cirka ee X.D.S.

3. Taliska Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha ee X.D.S.

4. Taliska Ciidanka Difaaca Cirka ee X.D.S.

b) Dhammaan Talisyada Ciidammada ee kor ku xusan maamul iyo hawl allaba waxay hoos yimaadaan Ta- liyaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Qod. 4aad

(Xeer — Nidaamiye)

Madaxweynaha J.D.S. isagoo dhegeystay talada Wasiir- ka Gaashaandhigga wuxuu soo saari karaa Xeer-Nidaamiye lagu faahfaahinaayo Dhismaha iyo xiriirka Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Qod. 5aad

( B U R I N )

Waxaa la buriyay xeerka lamb. 28 ee 17 Feberaayo 1977 kuna saabsanaa Mideynta jagooyinka Wasiirka Gaashaan- dhigga iyo Taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo xeer kas- ta oo ka soo horjeeda ama aan la socin karin xeerkan.

Qod. 6aad

(Dhaqan gelid)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafin- ta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 28 Maarso 1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS, L. 18 ee 28ka Maarso 1989: Magacaabidda Taliyaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S. iyo beddelaaddii ka dambeeyey;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 15 ee 6dii Abriil 1980 kuna saabsanaa «Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed»;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lamb. 17 ee 1 Feberaayo 1989 oo ku saabsan «Dib u habaynta qaab dhismeedka Wasaaradd. Gaashaandhigga»;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Taliyaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talo soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

Sarreeye Guuto MASLAX MAXAMED SIYAAD waxaa loo magacaabay Taliyaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 28 Maarso 1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 19, taariikh 5.3.1989: Magacaabidda Guddiga Heerka Qaran ee Gobollada W/Galbeed iyo Togdheer.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobbada 82 iyo 85 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 45 ee 23ka Disember1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Go'aannadii Kalfadhiga 4aad ee Golaha Dhexe XHKS ee Jennaayo 1989, gaar ahaan intooda ku saabsan xallinta dhibaatooyinka ka dhashay weerarkii iyo burburkii loo geystay degmooyin ka mid ah Gobollada Waqooyi Galbeed iyo Togdheer ee Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya;

MARKUU TIXGELIYEY: In wax ka qabashada degdegga ah ee dhibaatooyinkaas iyo fulinta go'aannadii laga gaaray ay doonayaan in la magacaabo Guddi ka kooban Mas'uuliyiin Sare oo ka Wakiil ah Madaxweynaha JDS, Xisbiga iyo Dowladda oo ka hawlgala goobahaas, lana siiyo awood aan caadi ahayn oo uu ku xalliyo mashaakilka jira ee la xiriira dib u dejinta dadkii firxaday iyo dib u dhisidda hantidii iyo dhaqaalihii burburay;

MARKUU DHEGEYSTAY: Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe XHKS;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

1. Gobollada Waqooyi Galbeed iyo Togdheer waxaa loo magacaabay Guddi Heer Qaran ah oo ka Wakiil ah Madaxweynaha JDS Xisbiga iyo Dawladda.

Gaar ahaan, Guddiga waxaa awood loo siiyey:

2 Guddigu waxa uu ka kooban yahay Xubnaha soo socda:

1 Jaalle Faarax Waceys Duule Guddoomiyaha Guddiga Kormeerka Golaha Dhexe XHKS — Guddoomiye;

2 Jaalle Maxamed Xawaadle Madar, Guddoomiye Kuxigeenka Golaha Shacbiga — Xubin;

3 Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame, Wasiirka Madaxtooyada JDS — Xubin.

Qod. 2aad

Guddigu isagoo ka tilmaan qaadanaya Madaxweynaha JDS, waxaa awood loo siiyey inuu hoggaamiyo siyaasadda, dhaqaalaha iyo Bulshada ee Gobollada kor ku tilmaaman iyo xaqiijinta caadiyeynta nabadgelyada, xasilloonida iyo nolosha Gobolladaas.

Qod. 3aad

Gaar ahaan, Guddiga waxaa awood loo sooyey

A) XAGGA DIB U DEJINTA DADWEYNAHA:

1. In uu qaado tallaabooyinka siyaasadeel ee u adeegaya dib u dejinta Dadweynaha qaxay;

2. In marka ay habboonaato, lana helo duruufo xaaladeed iyo mid dadeed oo saamaxaya, uu la yeesho wada xaajood fool ka fool ah, wax-garadka, Odayaasha iyo culumaa'udiinka degaannadaas.

B) XAGGA NABADGELYADA:

1. In uu qaado tallaabo kastoo kaalin ka geysan karta ku soo celinta Gobolladaas nabadgelyo iyo xasillooni buuxda;

2. In uu jiheeyo tilmaamana Ciidammada Nabadgelyada iyo Talisyada Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee aaggaas ku sugan kuna yeesho hawlgalkooda la xiriira sugidda nabadgelyada iyo xasilloonida go'aanka kama dambeysta ah.

T) XAGGA MAAMULKA:

1. In uu yeesho xulka, xil u dhiibidda iyo xil ka qaadidda Hawlwadeennada Xisbiga iyo Saraakiisha kale ee Dawladda ee ku sugan Gobolladaas;

2. In uu kormeero tilmaana siiyo hay'adaha kala duwan ee ku hawlan dib u dhisidda Gobolladaas.

Qod. 4aad

Muddo ku siman hal sano, laga billaabo dhaqangalka Xeerkan, Guddiga waxaa awood loo siiyey inuu dhiirrigeliyo ka dhoofinta xoolaha nool iyo badeecadaha kale ee Dalka JDS Dekedaha Gobolladaas iyo in uu dhiibo tas-hiilaad la xiriira dibad ka keenidda raashin iyo qalab dhismo oo ku kooban baahida Gobolladaas.

Qod. 5aad

Xoghayayaasha Xisbiga, Guddoomiyeaaysha Maamul-

ka Dawladda iyo Madaxda kale ee Hay'adaha Dawladda ee ku sugan aaggaas waxay tilmaan toos ah ka qaadanayaan Guddiga.

Qod. 6aad

Guddiga waxaa loo qoondeynayaa miisaaniyad u gaar ah oo lagu socodsiiyo hawlaha loo xilsaaray.

Qod. 7aad

Guddigu waxa uu yeelanayaa XAFIIS uga mas'uul ah hubinta iyo daba galka go'aannada iyo tilmaamaha la bixi-yey iyo hawlaha Xoghaynta iyo maamulka.

Qod. 8aad

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa isla marka uu saxii-xo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafin-ta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 5.3.1989

MADAXWEYNAHA JDS
( Maxamed Siyaad Barre )

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 20 ee 4 Maarso 1989: Magacaabid Notaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: harciyada Lr. 8 ee 15.2.1961 iyo Lr. 1 ee 2.3.1962. kuna saabsan hawsha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2.2.1986 oo Awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah iyo tartan la'aan u magacaabo Notaayo qofkii mudan.

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo A.D.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Dr. Bashiir Axmed Cabdi waxaa loo magacaabay Notaayo wuxuuna hawshiisa Notaayonimo ku fulniayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J D S waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4 Maarso 1989

MADAXWEYNAHA J D S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY. Arjiga uu soo qortay Marqaani Dayib Maxamed

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kaydka lam. 13513 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 62855.27 kuna qoran magaca Marqaani Dayib Maxamed sida ku cad warqadda Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka L. 13513 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 62855.27 kuna qoran magaca Marqaani Dayib Maxamed lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Marqaani Dayib Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 62855.27 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 63

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QALBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamuud Cabdulle Warsame;

HADDUU TIXGELIYEY: Inuu lumay Jeeg War. Lam. 0744591 oo laga sameeyey Laanta 4aad Xamar, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Xasan Dhoore, sida ku cad warqadda lam. 2337 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0744591 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Axmed Xasan Dhoore, lagana sameeyey Laanta 4aad Xamar, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 4aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamuud Cabdulle Warsame lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 64

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QALBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamed Saciid Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1419561 oo laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Saciid Maxamed, sida ku cad warqadda Lam. 2638 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xisaabaha Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1419561 kuna jirto lacag dhan SOh.So. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Saciid Maxamed lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Maxamed Saciid Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 65

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE MARKA

Lam: 8/89

GUDDOOMIYAHA. MAXKAMADDA G. SH/HOOSE

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARGAY: Buugga Kaydka Lam. 5919, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka, kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 201.766 (laba boqol iyo kow kun toddoba boqol lixdan iyo lix), uuna lahaa Xasan Cali Maxamuud, sida ku cad warqadda lam. yahay 000107, taariikh. tahay 7.3.89, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 9 ee 11.9.1965, No. 2

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lr. 5919 kuna qoran magaca Xasan Cali Maxamuud ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 201.766 (laba boqol iyo kow kun toddoba boqol lixdan iyo lix).

WUXUU AMRAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka u bedelo Xasan Cali Maxamuud Buugga kor ku tilmaaman, una sameeyey mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo 15 maalmood gudahood, maalinta lagu daabaco go'aankan Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Marka, 8.3.1989

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Sh/Hoose Marka
(Seylac Sheekh Cumar

L. 66

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xasan Daahir Dhimbil;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee lambarradoodu ay kala yihiin sidan hoos ku qoran:

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0608221 | 50.000 | Ardo Yuusuf | 2/Hargeysa |
| 245298 | 20.000 | Khadiijo Ismaaciil Axmed | Gebilay |
| 245302 | 20.000 | Cumar Faarax Coofle | » |

oo laga sameeyey Laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda Lr. 2348 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xisaabaha Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 90.000 kuna qoran magaca mid walba u hor qoran, lagana sameeyey Laamaha kor ku san ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan Xasan Daahir Dhimbil lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 90.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 67

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Axmed Dalal Faarax.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 1084752 Laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Kismaayo kuna jirto Lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca J/le Shariif Cabdalla Cali Maxamed Sida ku cad warqadda Lr. 8045 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/X/Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In La baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 1084752 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Kismaayo kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca J/le Shariif Cabdalla Cali Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L.K. In ay Siiso J/le Axmed Dalaal Faarax Lacagta Cadeyntu tahay sh.so. 100.000 oo ah bedalkii J/War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bi laabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho,17.8.88.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 68

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

HADDUU ARKAY: Warqadda Tr. Tahay 16.3.89, kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Gaalkacyo, kuna soo muujiyeen inuu J/War. Lr. 1432606 ee 13.3.89 uu ka Lumay J/le Cali Jaamac Biixi.

HADDUU ARKAY: In J/War. Laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Gaalkacyo kuna qornayd Lacag dhan

HADDUU ARKAY: Qod. 69aad ee xeer sharci ahaan Lr. 2 qornayd Lacag dhan Sh.So. 100.000;

HADDUU OGAADAY: In J/War. Baafin laga diray sida ku qoran taarka Tr. 163.89.

WAXAA LA AMRAYAA

In Jaallahaas loogu beddelo Jeeg cusub ee u dhigma kii ka Lumay, kadib markii amarkan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda ayna ka soo wareegto (30) sodon maalmood, waana in Jeegaas cusub oo la samayn doono gacanta Laga saaro J/le Cali Jaamac Biixi amase cid wakaalad sharci ah ka haysta.

(GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG)

Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali

Gaalkacyo, 18.3.89.

L 69

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Khadra Maxamuud Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 18425 oo laga sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, sida ku cad warqadda lam ———

HADDUU ARKAY: Qod 62 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr 18425 kuna jirto lacag dhan Sh So. 101.162.69 kuna qoran magaca Khadra Maxamuud Maxamed lagana sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Khadra Maxamuud Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 101.162.69 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 70

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Khaliif Cabdulle;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 18618 oo laga sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, sida ku cad warqadda lam. ——

HADDUU ARKAY: Qod. 62 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 18618 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 8.252.623.07 kuna qoran magaca Cabdulqaadir Khaliif Cabdulle lagana sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Cabdulqaadir Khaliif Cabdulle lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 8.252.623.07 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 71

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaaile Maka Maxamed Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 18348 oo laga sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, sida ku cad warqadda lam. ———

HADDUU ARKAY: Qod. 62 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 18348 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 1.769.72 kuna qoran magaca Maka Maxamed Yuusuf lagana sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

In Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Maka Maxamed Yuusuf lacagta cadeedu tahay Sh.So. 1.769.72 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor k uxusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Fasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 72

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Abshir Khaliif Cabdulle;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 4230 oo laga sameeyey Laanta 5aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, sida ku cad warqadda lam. ———.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 4230 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 66.435.79 kuna qoran magaca Abshir Khaliif Cabdulle lagana sameeyey Laanta 5aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 5aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Abshir Khaliif Cabdulle lacag ta cadadeedu tahay Sh.So. 66.435.79 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan la yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 73

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Maxamuud Gacal;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0039023 oo laga sameeyey Laanta Jowhar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, sida ku cad warqadda lam. 3097;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0039023 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40.000 kuna qoran magaca Cabdulqaadir Cabdulle Axmed lagana sameeyey Laanta Jowhar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Jowhar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Maxamed Maxamuud Gacal lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 40.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 74

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faadumo Ibraahim Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 4342 oo laga sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda Lr. ———

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU BEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 4342 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.343.34 kuna qoran magaca Faadumo Ibraahim Cali lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Faadumo Ibraahim Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 30.343.34 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, hdadii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 75

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Saciid Barkhad Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0093374 oo laga sameeyey Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda Lr. 3440;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0093374 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 150.000 kuna qoran magaca Axmed Ismaaciil Ducaale lagana sameeyey Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Saciid Barkhad Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 150 000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 76

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Cali Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay B. .g Kayd Lam. 1417 oo laga sameeyey Laanta Wadajir ee Ba...ga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda lam. 0183;
HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd L. 1417 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 35.504.00 kuna qoran magaca Xasan Cali Maxamed lagaan sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA.

Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Xasan Cali Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 35 504.00 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.
Muqdisho, 30.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)